



BEACH SAFETY BADBAADADA XEEBTA



Somali

Surf lifesavers and lifeguards prominently display flags and warning signs to indicate the safest areas to swim for the beach going public. Badbaadiyayaasha nolosha iyo waardiyaasha xeebta waxay soo bandhigaan calamo iyo calaamadaha digniin-bixinta si ay shacbiga xeebta tago u tilmaamaan aagaha si badbaado ah lagu dabaalan karo.

THE EASY WAY TO STAY SAFE AT THE BEACH IS TO REMEMBER THE 'FLAGS' MESSAGE

HABKA FUDUD EE SI BADBAADO AH LAGU JOOGO XEEBTA WAA MARKII LA XASUUSTO TILMAAMTA 'CALANKA' (F-L-A-G-S)

F

**FIND THE FLAGS AND SWIM BETWEEN THEM
HEL IYO KU DABAALO MEEL U DHEXEYA LABADA CALAN**

Calanka casaanka iyo huruudda ah waxay tilmaamaan aagaha xeebta ay ilaaliyaan badbaadiyayaasha nolosha iyo waardiyaasha xeebta. Waa aaga ugu badbaadsan xeebta oo lagu dabaalan karo.

L

**LOOK AT AND READ THE SAFETY SIGNS
EEG IYO AKHRI CALAAMADAHADA DIGNIIN-BIXINTA**

Calaamadaha digniin-bixinta waxay ku sheegi doonaan meelaha khatarta ah iyo xaalad-maalmeedka xeebta. Calaamadahaan waxaa laga helaa goobaha laga soo galo xeebta iyo aagaha calan lagu soo bandhigey. Fadlan si taxadar ah u akhri ka hor intii aadan biiyaha gelin.

A

**ASK A LIFESAVER OR LIFEGUARD FOR SOME GOOD ADVICE
TALO FIICAN KA CODSO BADBAADIYAHADA NOLOSHA AMA WAARDIYAHADA XEEBTA**

Xaaladaha hirka badda si deg-deg ah ayuu isku beddeli karaa (qoto-dheernimada biiyaha/badda, qul-qulka, cabbirka iyo nooca hirarka). La hadal badbaadiyaha nolosha ama waardiyaasha xeebta ka hor intii aadan gelin biiyaha.

G


**GET A FRIEND TO SWIM WITH YOU
QOF SAAXIB AH LA DABAALO**

Mar walba qof saxiib ah la dabaalo si aad isku ilaalisaa iyo caawinaad u heshaan haddii aad u baahan tihiin. Carruurta waa in mar walba qof wayn ilaaliyo.

S

**STICK YOUR HAND UP FOR HELP
GACANTAADA KOR U QAAD MARKII AAD CAAWINAAD U BAAHAN TAHAY**

Haddii aad biiyaha ku dhibaatoodo, is-deji. Gacantaada kor u qaad si aad u calaamadeyso inaad caawinaad u baahan tahay, qul-qulka biiyaha ku sabbay. Ha isku dayin inaad qul-qulka biiyaha ka hor dabaalato.



**REMEMBER NO FLAGS = NO SWIM
XASUUSO CALAN LA'AAN = HA DABAALANIN**

Supported by

WHAT DO THE FLAGS AND SIGNS MEAN? WAA MAXAY MACNAHA CALANKA IYO CALAAMADAH?



RED AND YELLOW FLAGS CALANKA CASAANKA IYO HURUUDDA AH

Waxuu tilmaamaa aaga ugu badbaadsan oo aad ku dabaalan karto iyo ilaaliyo badbaadiyayaasha nolosha iyo waardiyaasha xeebta.



YELLOW FLAG CALANKA HURUUDDA AH

Digniin – Xaaladda badda ayaa khatar noqon karo, hase-yeeshee weli si badbaado ah ayaad ugu dabaalan kartaa.



RED FLAG CALANKA CASAANKA AH

Khatar – Ha gelin biiyaha.
Markii calanka casaanka la soo bandhigo, xeebta laguma dabaalan karo.



RED AND WHITE QUARTERED FLAG CALANKA CASAANKA IYO CADDAANKA AH

Faruuqin deg-deg ah – Haddeerba ka bax biiyaha.
Markii calankaan la soo bandhigo iyo seeri (qaylo-dhaan) la yeeriyo waa in biiyaha laga soo baxo sababtoo ah waxaa jiri karo xaalad khatar ah. Xaaladahaan badankooda waxay dhacaan markii badbaadiyayaasha nolosha ama waardiyaasha xeebta ku mushquulsan yihiin badbaadin wayn ama markii badda lagu arko wax khatar ah.



BLUE FLAG CALANKA BALUUGGA AH

Waxay tilmaamaan aagaha alwaax lagu hir-raaci karo – dadka isticmaalo alwaaxa hir-raaca waa inay joogaan aagaha dibedda ka ah meelaha lagu bandhigey calanka casaanka iyo huruudda ah



DANGEROUS CURRENTS QUL-QUL KHATAR AH

Waxaa ka jiro qul-qul biyo oo khatar ah



BLUE BOTTLES MALLAY WAABAY NOOCA BLUE BOTTLES

Mallay waabay nooca Blue bottles ayaa badda ku jiro



MARINE STINGERS MALLAAY WAABAAY

Waxaa biiyaha ku jiro mallaay waabay khatar ah



HIGH SURF HIR DHEER

Hirarka waa kuwo wayn iyo khatar ah ama hirarka waa nooca soo rogma iyo lagu dhaawacmo



CROCODILES YAXAAS

Yaxaas ayaa aaga lagu arkey



NO SWIMMING DABAASHA WAA MAM- NUUC



SHARKS LIBAAX-BADEED

Libaax-badeed ayaa aaga lagu arkey



ONLY SWIM BETWEEN THE RED AND YELLOW FLAGS

Ku dabaalo oo kaliya meel u dhexeysa calanka casaanka iyo huruudda ah

Supported by